


# Keymaha Oregon

Guddiga Dhirta (Guddiga) iyo Waaxda Dhirta ee Oregon (ODF) ayaa korka kala socda keymaha Oregon. Waxay la shaqeeyaan Oregon's Kitchen Table (OKT) si loo ogaado waxa ay dadku qabaan ama ka aaminsan yihiin keymaha Oregon. Waxa Guddiga iyo ODF ay maqleen waxay qaabeyn doonaan qorshahooda istiraatijiyadeed ee cusub ee loogu talagalay keymaha.

OKT waxay u isticmaashay ra'yi ururintani iyo kulamadani si ay wax uga maqasho dadka Oregon oo dhan. Warbixintani waxay sheegaysaa waxa ay OKT maqashay.

## KU SAABSAN MIISKA JIKADA EE OREGON

OKT waa qayb ka mid ah Jaamacadda Gobolka Portland. OKT waxay ka shaqeysaa in dadka oo dhan la siiyo cod ah dhanka go'aan qaadashada dadweynaha. Waxaanu la hadalnaa dadka aan sida caadiga ah lagu darin go'aanadani. Waxaan dadka ka caawinaa in ay ka hadlaan arrimaha gobolka degaanka, iyo heerka goboleedka. Waxaa dhici karta in aanu isticmaalo siyaabo badan iyo luqaddo badan si loo ogaado waxa ay dadku qabaan iyo waayo-aragnimada. Waxaanan qiimeynaa fikradaha kala duwan iyo waayo-aragnimada dadku wax nooga sheegaan.

## SIDA AAN WAX UGA MAQALNAY DADKA

Waxaan isticmaalnay qalabka soo socda si aan u ogaano waxa ay dadku qabaan ama ka dareensan yihiin keymaha:

- Ra'iyi ururinta warqada ah
- Ra'yi ururinta dhanka internet-ka oo ku qoran sagaal luqaddood

- Wada hadalada bulshada OKT
- Booqashooyinka xafladaha iyo dhacdooyinka dhaqanka
- Tilmaamo loogu talagalay dadka si ay u qabtaan wada hadaladooda gaarka ah

Waxaan isticmaalnay qalabka soo socda si aan dadka ugu sheegno wax ku saabsan ra'yi ururinta iyo dhacdooyinka:

- Warbaahinta bulshada
- Nidaamyada farriinta koox ahaaneed
- Farriimaha email-ka iyo qoraalka ah
- Wicitaanada telefoonka
- Wacyigelinta shakhsi ahaaneed
- Warqado 'flyers' ayaa la dhigay gobolka oo dhan

## WAXAAN DADKA WAX KA WEYDIINAY

Marka hore, waxaan dadka wax uga sheegnay sida ODF iyo Guddigu u daryeelaan keymaha Oregon. Marka xigta, waxaan dadka wax ka weydiinay kuwa soo socda:

- Sida ay ugu xiran yihiin keymaha Oregon
- Sida ay jeclaan lahaayeen in ay si dheeraad ah ugu xirnaadaan
- Waxa ay u arkaan badbaadada kaynta iyo sida ay badbaado ugu sugnaadaan
- Sida ay u arkaan iskuguna diyaariyaan dhacdooyinka daran ee ka jira ama u dhow keymaha
- Waxay tahay waayo-aragnimada ay u leeyihiin dhanka keymaha

Waxaan sidoo kale cajalado maqal ah la wadaagnay dadka kale ee reer Oregon oo sheegaya waxa ay ka qabaan ama ka dareensan yihiin keymaha Oregon. Waxaan rabnaa in aan maqalno waayo-aragnimada dadka kale.

Ra'yi ururintu waxay sidoo kale dadka weydiisay halka ay ku nool yihiin, da'dooda, jinsigooda, qoymiyaddooda ama Qabiilkooda, iyo luqadda ay doorbidayaan in ay isticmaalaan.

## CIDDA AAN WAX KA MAQALNAY

Waxaan wax ka maqalnay in ka badan 4,000 oo qof. Waxay ka kala socdeen degaan kasta oo ku yaala Oregon. Waxaa ka mid ahaa kuwa soo socda:

- 3,870 qof oo ka soo jawaabay ra'yi ururinta
- Dad ka soo qayb galay 7 kulan oo ay gacanta ku hayeen abaabulayaasha bulshada
- Dad joogay 5 ah dhacdooyinka bulshada oo ka jiray 4 degaano gobolka ah
- Dad ka kala socday 40 urur oo noo sheegay waxa dadku ka sheegayaan keymaha

Ra'yi ururinta iyo dhacdooyinka ka dib, waxaan qabanay 4 kulan bulsho halkaasi oo dadku kaga hadleen waxa ay ilaa iyo hadda maqleen iyo waxa diiradda la saarayo.

## WAXA AAN MAQALNAY

Waxaan wax badan ka ogaanay waxa dadku qiimeeyaan ee ay ka aaminsan yihiin keymaha Oregon.

**Waxa dadku isku raaceen**

- Ku dhawaad qof kastaa wuxuu rabaa in uu xaqiijiyo in dadka reer Oregon ee mustaqbalku ay dareemi karaan in ay ku xiran yihiin keymaha. Si kastaba ha ahaatee, dadku waxay isku khilaafeen sida ay tahay in dadka kale ugu xirnaadaan keymaha.
- Dad badan ayaa rabay in ay dadka kale ka caawiyaan in ay fahmaan oo ilaaliyaan keymaha.
- Dad badani ayaa qiimeeya waxa dadka kale uga baahan yihiin keymaha. Waxay rabaan in ay arkaan isku dheelitirnaan ah dhanka isticmaalka ah.
- Dad badan ayaa raba in keymuhu u qalabeysnaadaan siyaabo ka caawinaya dadka oo dhan inay ku raaxeystaan. Waxay rabaan in dadku dareemaan in ay ka tirsan yihiin keymaha. Waxay rabaan xiriir dheeraad ah oo fool ka fool ah. Waxayna rabaan in dadka luqaddaha badan leh ay ku raaxeystaan keymaha.

- Dad badan ayaa raba in ay xaqiijiyaan in dhammaan dadka—gaar ahaan dadka midabyada kala duwan leh, dadka LGBTQ+, iyo dadka isku aqoonsan in ay yihiin dumar—ay dareemaan in la soo dhaweynayo oo ammaan ku haystaan keymaha.
- Dad badan ayaa ka walwalsan arrimaha dabka kaynta ee soo socda:
    - Sida ay dadku u arkaan dabka kaynta
    - Sida dadku ugu diyaar garoobaan dabka kaynta
    - Sida ay tahay in Oregon u maareyso keymaha si ay wax uga qabato dabka kaynta
    - Waxa dadku sameyn karaan si looga hortaggo dabka kaynta
- Dad badan ayaa ka walwalsan caafimaadka keymaha. Waxay ku kala duwan yihiin waxa uu yahay macnaha "healthy forest" iyo sida keymaha looga dhigayo kuwo caafimaad leh.
- Dad badan ayaa sheegay in dadka kale ku qaldan yihiin cilmiga ku xeeran keymaha. Haddana kuwo badan waxay sheegeen in waxbarasho dheeraad ah oo ku saabsan keymaha noqoto mid la heli karo, oo ay ku jiraan kuwa soo socda:
    - Sida loo dhaqmayo keymaha dhexdeeda
    - Macluumaadka ku saabsan nidaamyada deegaanka keymaha
    - Sida ay dadka kale u arkaan keymaha
    - Sida ay keymuhu u saameeyaan bulshooyinka

**Waxa dadku isku khilaafeen**

- Dadku waxay isku khilaafeen cidda ay tahay in ay isticmaasho keymaha iyada oo lagu saleynayo cidda iska leh dhulka.
- Waxay sidoo kale isku khilaafeen cidda ay tahay in ay gaarto go’aanada ku saabsan keymaha.
- Dadku waxay isku khilaafeen isticmaalayaasha iyo hawlaha ay tahay in la oggolaado keymaha dhexdeedo.

- Dadku waxay isku khilaafeen cidda ugu aqoonta badan sida loo maareeyo keymaha. Qaarkood ayaa dareemay in dadka ugu dhow kaynta ay aqoon badan u leeyihiin.

## WAXA DHACAYA EE XIGA

Faallooyinka dadku waxay siinayaan ODF iyo Guddiga fikrado ku saabsan waxa lagu darayo qorshahooda istiraatijiyadeed. ODF iyo Guddiga waxay sidoo kale maqleen fikrado cusub oo ku saabsan sida loo helo fikrado mustaqbalka. Dadku waxay jecel yihiin in ay wax badan go'aan gaarayaasha kala hadlaan keymaha Oregon.

ODF iyo Guddigu waxay sameyn karaan kuwa soo socda:

- Cusbooneysiinta qorshaha istiraatiijiyadeed sida keymaha--iyo sida dadka reer Oregon u isticmaalaan keymaha--isbeddelka.
- Adeegsiga waxbarashada la wadaago oo u dhaxaysa xubnaha ka tirsan bulshada, ODF, iyo Guddiga.
- Ka wada hadalka arrin gaar ah oo ka jirta halka ay dadku sida aadka uga walwalsan yihiin ee ku saabsan arrinta.
- Helida dad badan oo reer Oregon ah oo wadaaga sheekooyinkooda ku saabsan keymaha.
- Yeelashada dood qoto dheer oo diiradda la saarayo hal arrin markiiba.
- Diiradda oo la saaro wada hadalada fool ka foolka ah.
- Helida hawl-wadaagayaal arrimaha keymaha kala hadli kara dadka ka tirsan bulshadooda.

## GUNAANADKA

Dad badan ayaa dareen xoogan ka qaba waxay uga baahan yihiin keymaha Oregon. Si kastaba ha ahaatee, waxay sidoo kale daneeyaan waxa ay dadka kale u baahan yihiin. Way ogyihiin in dheelitirkaasi kuwani u baahan yihiin uu noqon doono mid adag maxaa yeelay waxay dadku xiriir qoto dheer la leeyihiin keymaha.

Dad badan – oo ay ku jiraan ODF iyo Guddigu – waxay rabaan in ay dadka ka caawiyaan in ay fahmaan baahiyaha midba midka kale leeyahay iyo ku xirnaanta ay

la leeyihiin keymaha. Waxay rajeynayaan in dadku arki doonaan in ay iskaga mid yihiin dhinacyo badan.  Ku dhawaad qof kastaa wuxuu si adag iskugu raacay hal shay: waxay rabaan in ay xaqiijiyaan in dadka reer Oregon ee mustaqbalku ay keymaha ugu xirmi karaan siyaabo iyaga muhiim u ah.  Waxaan rajeynaynaa in rabitaankani la wadaago uu ka dhigi doono dadka in ay ka hadlaan waxa u wanaagsan keymaha Oregon.